

## **La-Taliyaasha Waalidka ee Gaadiidka Ardayda Benson ay u Raacayaan Marshall Maayo 2021**

### **Safar cusub ayaa bilaabmaya**

Bulshada Benson Polytechnic wuxuu u guuri doonaa Dhismaha Iskuulka Marshall saddexda sanad-dugsiyeed ee soo socda, 2021-22 ilaa 2023-24 maadaama la bilaabay in dib loo caysriyeynayo dhismaha Dugsiga Sarre ee Benson. Haddaba dhismuhu muuqaalkiisu wuu ka gedisanaan doonaa sidii hore laakiin macallimiintii wanaagsaneyd ee Benson waa isla macallimiintii, shaqaalaha iyo barnaamijyadu waxay noqon doonaan kuwii hore ee hore loo qaadan jirey. La-taliyaashani waxa ay isku dayayaan sidii ay u caawin lahaayeen qoysaska iyo ardayda inay fahmaan.

### **Sidee ayey ardayda Benson ku tagi doonaan Dhismaha Iskuulka Marshall?**

Waxba kama duwan sidii ay ardayda iskuulada Madison/McDaniel hore ugu tageen, Ardayda Benson waxa ay isticmaali doonaan gaadiido kala gedisan sidii ay u tagi lahaayeen dhismaha Iskuulka Marshall 3905 SE 91st Ave. Iyada oo ay qeyb ka tahay daarasadda ay waaxda gaadiidka PPS sameysay, Dugsiga Benson Polytechnic ardayda wax ka baraneysa waxaa loo qeybiyey 2 “aag”: CAGAAR, iyo CASAAN si loo go’aamiyo sida ay ardaydu u isticmaali doonaan gaadiidka kala duwan ee ay kala dooranayaan sidii ay u gaari lahaayeen Dhismaha Iskuulka Marshall.

### **(Fadlan fiiri Khariirada ku taala bogga 3 )**

Ardayd iskuulada Roosevelt, Jefferson, McDaniel, Lincoln iyo Wilson waxay raaci doonaan basaska jaalaha ee iskuuladu leeyihiin. Ardayda dhigata Cleveland, Franklin, iyo inta badan ardayd Grant waxa ay isticmaali doonaa Basaska Trimet iyo /ama Tareenka MAX ama waxa ay isticmaali doonaan baabuurtooda haddii ay doortaan.

### **Sidee ayey ardayd waxbarashada gaarka ahi ku tagayaan Dhismaha Iskuulka Marshall?**

Dhammaan ardayd hadda ee waxbarashada gaarka ah qaata kuwaasi oo raaca gaadiidka PPS waxa ay sii wadi doonaan inay raacaan gaadiidkaasi. Addeega Basaska Jaalaha ah ee ay raacaan ardayda waxbarashada gaarka ah waxba iskama bedelayaan.

### **Halkani Waa Khariirada Aaga 1aad ee Cas. Halkee ayaan ka heli karaa macluumaadka ku saabsan basaska PPS ee tagaya Marshall ?**

- Ardayda loo qoondeeyey Aaga 1aad ee Cas kuwaasi oo kala ah iskuulada (*Roosevelt, Jefferson, McDaniel, Lincoln iyo Wilson*) waxa ay isticmaali doonaan basaska jaalaha sidii ay u tegi lahaayeen dhismaha Marshall. Waxa ay ka tegi doonaan kuna soo noqon doonaan goobaha basaska laga raaco ee u dhow Aagaga Cas ee iskuulada, kuwaasi oo ku salaysan nidaamkii loo dhigay inay ardayda dugsiga sarre u soo lugeeyaan hal mayl la joojiyo **(Fiiri Khariirada bogga 3)**
- Waqtiyada subaxii basaska la raacayo iyo meelaha lagu dagayo galinka dambe, waxaad tixraac ku sameysaan shabakada guud ee gaadiidka PPS: <https://sites.google.com/pps.net/gt-bus-schedule/GT-Bus-Schedules> **(FADLAN OGAADA - Wali lama go’aamin wadooyinka basasku mari doonaan iyo saacadaha ee sanad-dugsiyeedka 2021-22. Boggan waxaa la heli doonaa bishan Ogosto 2021, maalin ka hor**

maalinta uu iskuulku la furayo.) Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka waxaa laga heli karaa shabakada Waaxda gaadiidka: <https://www.pps.net/Domain/61>

- Waxaanu si adag ku tallo bixineynaa inay ardaydu shan daqiiqo ka hor yimaadaan goobaha basaska laga raacayo.
- Hawlaha la qabto marka iskuulku dhammaado, dhammaan basaska Aaga Cas waxa ay ku noqon doonaan darisyadii iyaga ka tegi doonaa markiiba Marshall ka dib marka ay dhammaato xiisada ugu dambaysa iskuulka.
- **Tani waxay u gaar ah ardayda qaata baska mara dariiqa 82<sup>nd</sup> Ave waxaan si adag kula tallineynaa inay isticmaalaan dariiqa 82<sup>nd</sup> iyo goobta basku istaago ee Dariiqa Xarunta Dhexe maadaama isgoyska xiga ee dariiq si nabadgelyo leh looga tallaabi karo.**
- Xeerarka ama Xayiraadaha la xiriiira COVID-19 ee Gaadiidka PPS fadlan waxaad booqataa shabakadani si aad u hesho macluumaadh dheeraad ah, [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [中文](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#)

### **Sidee ayey Ardayda Aaga Cagaaran ku tagayaan Marshall?**

Ardayda loo qoondeeyey Aaga Cagaaran ee iskuulada (Cleveland, Franklin, iyo qeyb ka mid ah iskuulka Grant) waxa ay isticmaali doonaa gaadiidka TriMet oo bilaash u ah iyo baabuurtooda gaarka ah sidii ay u gaari lahaayeen dhismaha iskuulka Marshall. Si aad wax badan uga ogaato MAX iyo dariiqyada ay maraan basku ee ku geynaya Dhismaha Marshall waxaad ka hubisaa boga jadwalka TriMet ee: <http://trimet.org/schedules/index.htm> ama, haddii aad raadineysa app saxda ah ee TriMet ee telefoonkaaga, waxaad tegtaa halkan: <http://trimet.org/apps/index.htm>. Waad iska diiwaangalin kartaa sidii ay kuu siin lahaayeen addeega inay si degdeg ah kuula socodsiiyaan dariiq kasta oo ay basaskoodu marayaan <https://trimet.org/emailupdates/index.htm>.

Fadlan ha ka tallaabin jidadka marka laga reebo oo kaliya waxaad martaa meelaha loogu talagalay in la maro marka jidka la goynayo sidoo kale xusuusnow mar walba marka aad galayso tareenka iyo basaska ama aad ka degeyso iyo waliba marka aad jidadka goyneysa. Haddii aad baaskiilkaaga ku soo gaarto MAX, waxaan ardayda ku dhiirigalineynaa inay baaskiilkooda ku xirtaan rugta loogu talagalay sidii aan uga taxadiri lahayn in nidaamku noqdo cidhiidhi saacdaha la shaqo tagayo ama la soo rawaxayo.

### **Lacag La'aan Miyey Ardaydayadu Ku Raacayaan TriMet?**

Dhammaan ardayda Benson Polytechnic waxay xaq u leeyihiin inay kaadhka ardayda bilaash ugu raacdo gaadiidka. Barnaamijka ardaydu ugu raacdo TriMet bilashka ee la yiraa (YouthPass) waa xiriir iskaashi oo ka dhexeya TriMet iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland.

### **Waa maxay waqtiyada safarada dayrtani ee uu MAX u addeego Dhismaha Marshall?**

Subaxdii iyo duhurkii ugu dambeyn waqtiyada MAX uu tago iyo waqtiyada uu ka soo noqdo dhismaha Marshall. Fadlan waxaad ka talo qaadataa shabakada TriMet. <https://trimet.org/>

### **Basas miyaa la siin doonaa marka ay ardaydu qaadanayaa hawlaha waxbarasho ee dheeraadka manhajka qaar ka mid ah habeenkii?**

Basaska hawlaha gaarka ee ardaydu ka qeybqaanayaan marka iskuulka la xiro ka dib waxa ay ka tegi doonaan dhismaha Marshall iyaga oo ku deji doona ardayda dariiqyadii loogu talagalay

baska ee u dhow guryahooda halkaasi oo ah goob nabadgelyo ah. Waqtiyada basaska hawlaha gaarka ah waxaa la sheegi doonaa marka uu bilaabmayo sanad-dugsiyeedku.

### **Macluumaadka Goobta Baabuurta La Dhigo, Baabuurta La Wada Raaco iyo Baabuurta Iskuulka Loo Soo Kaxaysto**

Ardayda iyo waalidiinta baabuurta u soo kaxaysanaya dhismahan iskuulka waxaa jira goobo fara badan oo aad baabuurta dhigan kartaan iyada oo ay dhib yar tahay inaad heshaan goobo aad ku dejisaan ardaydiina kuwaasi oo ah goobta iskuulka laga soo galo. Waxaan waalidiinta iyo ardyda ku dhiirigalineynaa inay baabuur soo wada raacaan. Iskuulku wuxuu ku yaalaa marka la imanayo jidka 92 iyo halka ay iska jaraan Koonfurta Powell Blvd.

### **Waa maxay sababta loo siin waayey addeega baska jaalaha ardayda Benson Polytechnic in lagu geeyo Marshall?**

Sida caadadu tahay si joogta ah Dugsiyada Dadweynaha Portland ma siiyaan ardayda dugsiyada sarre addeegyada basaska jaalaha ah ee degmada iyada oo kharashka ku baxaya in la siiyo addeega baska jaalaha dhammaan ardayda Benson wuxuu noqonayaan mid qaali ah. Daraasad lagu sameeyey gaadiidka oo ay dib u eegis ku sameeyey inta jeer ay safarku noqonayo in la tago dhismaha Marshall degmada oo dhan iyo go'aanka qoysaska qaar, waxa iman karta waqtiyo fara badan oo la tagayo lagana soo noqonayo dhismaha Marshall. Sidaas daraadeed, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay soo saareen labo dariiqo oo loo bixinayo addeegyada gaadiidka inta ay ardayda Benson sida ku meel gaarka u tagayaa Marshall.

### **Waa maxay sababta loogu doortay dhismaha Marshall in Benson si ku meel gaar ah u isticmaalo ?**

Intii lagu gudo jiray qorsheynta diyaarinta maaligalinta dhaqaale, Dugsiga Sarre ee Marshall waxaa loo doortay inuu yahay goobta ugu wanaagsan ee si ku meel gaar ah loo isticmaali karo inta dib u dhisku ka socdo iskuulada (Franklin, Grant, iyo McDaniel waxa dhammaan isticmaaleen goobta). Dugsigani Sarre ee hore wuxuu leeyahay dhamaan kaabayaashii lagama maarmaanka u ahaa in la guuleystaan inta uu bulshada Benson ay u isticmaalayso sida ku meel gaarka ah.

